MOVING TO WORK [BARNAAMIJKA HAWLGALKA] QORSHAHA SANADLAHA AH 2024

Sanad Maaliyadeedka Janaayo 1 - December 31, 2024

Oo uu ansixiyey Gudiga Maamulka Ee MPHA:

Loona gudbiyey HUD:

Dib loo eegay loona gudbiyey HUD:

EQUAL HOUSING OPPORTUNITY EQUAL EMPLOYMENT OPPORTUNITY

XUBNAHA GUDIGA MAAMULKA EE GURYAHA DADWEYNAHA EE MINNEAPOLIS

Tom Hoch, Gudoomiye
Elfric Porte, Gudoomiye ku xigeen
Alyssa Erickson, Xogheyn
Medaria Arradondo, Xubin Guddi
Mikkel Beckman, Xubin Guddi
Abdullahi Issa, Xubin Guddi
Cara Letofsky, Xubin Guddi
Tamir Mohamud, Xubin Guddi
Hon. James Rosenbaum, Xubin Guddi
Abdi Warsame, Madaxa Fulinta/ CEO

ODhaahda

HAWLGALKA

Dhiiri gelinta iyo gaarsiinta guryo si wanaagsan loo dayactiray, dadka isku dhafka ah ee dakhligoodu yar yahay , innaga oo kaashaneyna hay'adaha nagala shaqeeya, oo gacan ka geysanaya fayo qabka shakhsiyaadka, qoysaska iyo bulshada aan u adeegno .

XOGTA BARNAAMIJKA HAWLGALKA

Kongareeska ayaa abuuray Barnaamijka Hawlgalka Ee Dib U dhiska (MTW) sanadkii 1996. Barnamijka waa mid u ogolaanaya maamulka guryaha dadweynaha in ay naqshadeeyaan oo ay tijaabiyaan hal abuurka, istaraatiijiyad degaanka ka timid ee hoy loogu helayo qoysaska dakhligoodu hooseeyo guryo ay awoodi karaan. MTW waxa ay hay'adda u ogolaaneysaa in laga dhaafo qaar badan oo ka mid ah sharciyada HUD si ay u gaaraan mid ka ah sadexda ujeedo ee sharcigu waajib kaga dhigayo:

(1) kordhinta kalad oorashada guryaha,

(2) abuuritaanka fursadaha qoysaska caruurta heysta si ay noqdaan kuwo gaara isku filaasho, iyo

(3) beekhaaminta kharashka si hay'addu u noqoto mid taabagal ah.

Ka qeybgalka barnaamijka MTW ma kordhineyso dhaqaalaha laga helo HUD, sida uu u dhigan yahay magaciisa. Hay'adaha ka qeyb qaata MTW waxa ay lacagta ugu kala wareejin karaan barnaamijyada sida ay doonaan, iyaga oo raacaya nidaamka u degsan, si wax looga qabto baahida degaanka. Taasi waxa ay MPHA siineysaa fursad dheeraad ah oo isbedelka ku yimaada dhaqaalaha dawladda iyo naqshadeynta barnaamijyada taasoo u ogolaaneysa in ay si wanaagsan ugu adeegaan bulshada Minneapolis.

Sanad kasta, hay'adaha MTW waa in HUD u diyaariyaan laba qoraal. Xilliga xaagaga, MPHA waxa ay MTW u gudbineysaa Qorshaha Sanadlaha ah taasoo ay MPHA faahfaahin ka bixineyso sida ay dooneyso in ay uga faa'iideysato isbededelka MTW ee sanadaha soo socda. Qorshaha sanadlaha ah waxaa ka mid ah faahfaahin ku saabsan barnaamijyada, fursadaha iyo maalgelinta hantida ma guurtada ah ee guriyeynta iyo sidoo kale hal abuurka cusub ee MTW ee hay'addu dooneyso in ay fuliso. Xagaa kasta, Mpha waxa ay soo gudbineysaa Warbixinta Sanadlaha ah ee MTW, taasoo qiimeyn lagu sameeyo horumarka aan ku talaabsaneyno marka loo eego gaaritaanka yoolkeena ee sanadihii hore, iyada oo la soo gudbiyo xogtii ugu dambeysay ee lagu ogolaaday hawlaha MTW. Waxyaabaha ay ka kooban yihiin labada qoraal waxaa ogolaaday HUD.

Macluumaad dheeraad ah, la soo xiriir: Shaqaalaha MPHA *ee (MTW@mplspha.org)*

MINNEAPOLIS PUBLIC HOUSING AUTHORITY

HORUDHAC/DULMAR GUUD

Ka dib markii uu maray nidaam ay xubno fara badan oo kala duwan ay ra'yigooda ka dhiibteen, gudiga maamulka ayaa ogolaaday qorshaha Istaraartiijiyadda 25 Janaayo 2023. Qorshuhu waxa uu faahfaahin ka bixinayaa qorshaha shanta sano ee balaarinta iyo badbaadinta guryaha dadweynaha, iyada oo la kordhinayo qoysaska iyo shaqsiyaadka aan u adeegeyno maanta iyo mustaqbalka. In la abuuro qorshe ay dadku dhextaal u yihiin oo ku saleysan ururinta xogta ee marxaladaha kala duwan. MPHA waxa ay qaaday wareysiyo ay la yeesheen hay'daha ka qeyb qaadanaya ee Degmada iyo Magaalada, gudiyada Maamulka iyo madaxda Hay'adaha. Waxaa intaas dheer, sahanka waxaa loo diray qof kasta oo magaalada deggan, barnaamijyada ka qeyb qaadanaya, shaqaalaha MPHA iyo gudiyada maamulka. Dhamaan xogta la soo ururiyey waxa ay qeyb ka tahay daraasadda SWOT oo gundhigga u ah ogaanshaha meelaha ay MPHA ku wanaagsan tahay, dabcasanaan kaga jirto, fursadaha ay ku jiraan ama khatar kaga soo aadan tahay.

Sida loo fulinayo, waxaa talo naga siinaya Bronner Group, LLC oo xoogga saareysa wada shaqeynta iyo ka wada qeyb qaadashada. Ka qeybgalkaas qotoda dheer waxa uu dhiirigelinayaa in qiimeyn guud lagu sameeyo xaaladda hay'adda iyada oo ka mid ah hay'adaha safka hore ee Minneapolis. Fahamka sida wax u socdaan, baahida iyo muhimad kala siinta bulshada ee MPHA taasoo ka caawineysa abuuritaanka ee hay'addu u dajisay muhimad kala siinta.



Tan iyo bilowgii 2023, hay'addu waxa ay bilowday dhaqan gelinta qorshaha cusub ee istaraatiijiyadda. MPHA waxa ay aasaas adag u dhigtay hay'ad waxqabadkeedu ku saleysan yahay mudada dheer iyada oo maanka lau hayo sidii si joogta ah loo horumarin lahaa horumarinta agabka iminka la heysto. Nidaamkayagu waa mid aanu ku beegsneyno

muhimad kala siinta.

1) In aan u adeegno dadka bulshadeena ka tirsan.
2) In aan badbaadino fursadaha guriyeynta iyada oo la maalgelinayo dayactirka guryaha iyo casriyeyntooda.
3) In la dhiso guryo dheeraad ah marka y ku haboon tahay, iyo
4) In gacan saar lala yeesho si loo xaqqijiyo saameynta mudada dheer ee bulshada aan u adeegno.

Xogtii U Dambeysay ee Qodobada U Gaarka Ah MTW

Qorshaha MTW ee guriyeynta, waxaa suurogal ah in MPHA laga dhaafo qaar ka mid ah sharciyada u degsan dawladda dhexe si wax looga qabto baahida degaanka iyo adeegga bulshada Minneapolis. Qorshaha Sanadlaha ah ee, MPHA ma soo bandhigeyso hal abuur cusub mana aha isbedel balaaran oo lagu sameeyo hawlaha ay iminka fulineyso. Tani waxa ay calaamad u tahay sida ay nooga go'an tahay qodobada aasaaska ah ee aan ku hawlgalno.

Hay'adda oo xoogga saarta sidii ay dadku u heli lahaayeen guryo tayo sare leh oo amaan ah cudurka dilaacay ka dib waa mid dardar gelineysa dadka ku xiran in ay MPHA ka dhigto kirada mid awoodi karaan. Dhiirigelinta hay'ad uu dadku dhextaal u yahay, daacad ka ah wada shaqeynta iyo hal abuurka sida ugu wanaagsan oo hawsha loo qaban karo cudurka dilaacay ka dib. Inkasta oo ujeedada ugu weyn ay tahay in la dhiso aasaas aad u adag oo wax looga qabto baahida bulshada.

Tani waxa ay si gaar ah fure ugu tahay xaqiijinta in MPHA ay awood u leedahay dhaqan gelinta sharciyada cusub ee HUD ee laga soo bandhigay fursadaha ugu dambeeya ee Sharciga Dib U Casriyeynta (Modernization Act) (HOTMA) iyo Heerka Qaranka ee Baaritaanka Xaaladda Guryaha (NSPIRE) taasoo ujeedadu tahay in lagu yareeyo culeyska soo gaara dadka isticmaala iyo missaniaydda ka timaadda dawladda dhexe oo marka aan k filneyn. Innaga ayaa mas'uuliyad naga saaran tahay xaqiijinta in heerarkaan iyada oo aan hakad la gelin adeegga loo qabto deganayaasha sida ugu tayo wanaagsan, iyada oo la joogteenayo awooda maaliyadeed si loo sii wado adeegga deganayaasha sanadaha soo socda.

Badbaadinta Iyo Abuuritaanka Guryaha

Taariikh ahaan, gargaarka dawladda dhexe ee hantida waa mid ah qiyaastii daboola 10% baahida maaliyadeed ee MPHA. Sida taariikhda ku xusan, MPHA waxa ay guryaha ku maamushaa nidaam aad u sareeya iyada oo ay jiraan caqabado dhinaca maaliyadda ah. Waxaanu dooneynaa in aan joogteyno heerkaas aan gaarsiinay inaga oo isku dayeyna in aan dhaqaale uga raadino barnaamij kasta oo suurogal ah, oo lagu lamaanin karo kuwa dawladda dhexe, lana jaanqaadi kara ujeedada guriyeynta ee qoysaska dakhligoodu hooseeyo ee degan magaalada.

Hawlgal kasta oo horumarin ah oo MPHA ku dhaqaaqdo waa inuu noqdaa mid uu ogolaado gudiga waafaqsan *Sharciyada Aasaasiga Ah ee Lagu Maamulo Dib U Horumarinta iyo Maalgelinta*. Deganayaasha guryaha ee MPHA iyo xubnaha bulshada ee ka qeyb qaadanaya waa ay u cadahay oo ay ka dharagsan yihiin wadiiqada loo marayo, iyo ilaalinta xuquuqda deganayaasha inta ay hawshani socoto. Iyada oo loo sameynayo ilaalin dheeraad ah, Bayaan Wada Shaqeyn ah (MOU) oo u dhaxeeya magaalada iyo MPHA ayaa lagu caddeeyey sida ay labadaba uga go'an tahay maalgelinta guryaha dadweynaha, gacan ku heynta mudada dheer ee guryaha, iyo ilaalinta xuquuqda qof kasta oo dagane ah.

Horumarka la taaban karo ee la xiriira *Badbaadinta Iyo Abuuritaanka Guryaha* waxaa ka mid ahaa:

Dhameystirka Dayactirka Elliot Twins: Dhamaadkii 2021, MPHA waxa ay dhameystirtay dayactir guud iyo balaarin lagu sameeyey Elliot Twins. Bishii Juun ee 2020, MPHA waxa ay 174 guri u wareejisay mashruuca ku saleysan foojarka ee bandhigga Gargaarka Kirada (RAD) iyo dib u casriyeynta 10 guri guryo markiiba loo guuri karo. U wareejinta barnaamijka (RAD) waxaa ay MPHA u ogolaanaysaa in ay helaan damaanadda gobolka ee Canshuur Dhaafka Guryaha Dadka Dakhligoodu Yar Yahay si loogu maalgeliyo $27 milyan oo ku baxeysa dayactirka–dayactirkii ugu balaarnaa ee inta la og yahay taariikhda Minnesota lagu sameeyo guryaha dadweynaya, sadex laab ka balaaran tan ay hirgeliso MPHA. Waxaa intaas dheer in ay taasi ka dhigan tahay awood maalgalineed ee horumarinta daaraha dhaadheer, mashruuca Elliot waxaa tusaale u yahay sida ay uga go'an tahay iyo awoodda MPHA ee u fidinta guriyeyn ku meel gaar ah dhibanayaasha ay dhibaatadu ka soo gaartay hawlaha deganayaasha waaweyn, oo aan heysan meel ay si rasmi ah u dagaan. Deganayaasha intooda badan waxa ay doorteen in ay ku nagaadaan degankooda inta uu socdo dhismuhu. MPHA ayaa gacanta ku heyneysa maamulka guryaha, iyada oo la ilaalinayo in ay noqdaan kuwa dadku awoodo mudada heshiiska kirada ee 99ka sano ah.

Mashruuca Balaarinta Guryaha Qoysaska ee MPHA: Bishii Oktoobar ee 2020, MPHA waxa ay dhameystirtay u wareejinta Section 18 wax ka badan 700 guri ee kuwa qoysaska ah (afar afar isugu dhagan, guryaha isku dhagan, iyo inta badan kuwo goonidooda u taagan) ee magaalada oo dhan, iyada mulkiyadda guryahaas lagu wareejiyey hay'aad aan

faa'iido doon aheyn, Adeegga Guriyeynta ee Bulshada. MPHA daraasad hoose ayey ku sameysay nidaamkan si ay u aqoonsato hantida ugu haboon dib u dhiska iyo kordhinta xajmigooda. Daraasad ay sameysay MPHA waxaa lagu aqoonsaday 15 goobood oo ka kooban 21 guri in dib u dhis lagu sameeyo laguna bedelo 78 guri oo ah nidaamka PBV. Lix iyo toban goobood oo laga helay Magaalada Minneapolis ayaa laga dhisayaa lix guri, taasoo tirada gaarsiineysa 84 guri oo kuwa qoysaska ee magaalada ku baahsan. Guryahaas cusub waa kuwo si fudud loo dayactiri karo oo wax weyn ka bedelaya nolosha deganayaasha Dib u casriyeynta lagu sameeyey Elliot Twins, waxa uu mashruucan keeni karaa maalgelin iyo Canshuur Dhaafka Guryaha oo meelo kala duwan ka imanaya si loogu abuuro guryo dheeraad ah oo qoysasku bulshadeenu awoodaan. Xisaabaha MPHA waxaa ala xiray deyrtii 2022 iyada oo la dhagax dhigay dhismaha cusub Janaayo 2023. Isticmaalka nidaamka dhismaha ee loo yaqaan "modular" ayaa MPHA u suurogeliyey in dhismaha guryahaaas lagu dhameytiro waqti ka degdeg badan dhismayaasha caadiga ah.

MPHA waxa ay sii waday in ay daraasad ku sameysay qodobo dheeraad ah oo lagu raadinayo oo dib u casriyeyn ah oo lagu kordhinayo fursadaha guriyeynta ee qoysaska. Sanadka 2023, MPHA waxa ay aqoonsatay laba guri oo gunidooda u taagan oo dib loo casriyeynayo taasoo ay hoy ka heli karaan ilaa shan qoys oo cusub. MPHA waxa ay ku talo jirtaa ka faa'iideysiga ka guuritaanka Faircloth loona guuro RAD si taageero loogu helo sadex guri oo cusub oo mashruucan hirgeliyo, iyada oo laga yaabo in aan tixgelino in mashruucan ay ka qeyb qaataan guryaha foojarka ku saleysan. Waxaa intaas dheer, in iyada oo ku saleysan daraasad la sameeyey 2023, ay MPHA aaminsan tahay in fursado dheeraad ah la siiyo guryaha ka diiwaan gashan CHR, shaqaalaha ayaa dabagal dheeraad ah ku sameynaya fursadaha 2024waxaana suurogal ah in dib u casriyeynta guryaha qoysaska ay bilaabatay dhamaadka 2024.

Barnaamijka Dayactirka Guryaha Goonida U Taagan: Iyada oo la eegayo maalgelinta foojarka-ilaalinta xuquuqda-deganayaasha taasoo ka dhalatay u wareegista Section 18, MPHA waxa ay raadineysay hab ay ku heli karto maalgelin dheeraad ah si loo dhameystiro dayactirka waaweyn iyo dib u dhiska loona xaqiijiyo in guryaha ku baahsan magaalada ay ku taagnaadeen ujeedooyinkii markii hore loo abuuray. Iyadoo oo shaqaaluhu tixgelinayaan fursadaha maaliyadeed ee hawlaha waaweyn, dib u dhiska balaaran, hay'addu waxa ay CHR u qoondeysay $2.5anadka 2023 in ay ku dhameystirto dayactirka sida saqafka/dhinaca guryaha iyo jikada ee guryaha dib loola soo noqday. Jacob Frey, Duqa Magaalada Minneapolis, waxa uu sidoo kale maalgeliyey $3.5 milyan oo uu ku taageerayo Maamulka Guryaha ee Minneapolis barnaamijkeeda dib u dhiska ee CHR, maalgelinta dhismayaashii hore ee lagu taageerayo Mashruuca Balaarinta Guryaha Qoysaska. Sidoo kale 2023, MPHA waxa ay olole u gashay helitaanka dhaqaale dheeraad ah oo lagu maalgeliyo mashruucan ee heer gobol, taasoo ay natiijadu noqotay $5 milyan oo si toos ah loogu qoondeeyo taasoo la heli karo 2023. MPHA wxaa ay dooneysaa in dhaqaalahan dheeraadka uu MPHA ka caawiyo dib u dayactirka guryaha ku baahsan magaalada ee 2024.

Dhismayaal Dhaadheer Oo Dheeraad Ah Oo Laga Codsado RAD: Sanadka 2022/2023 waxa ay MPHA bilowday in ay dib ugu noqoto nidaamka Aragtida Istaraatiijiyadda ee hadafka Hay'adda iyo muhimad kala siinta wareejinta guryaha ee mustaqbalka taasoo u ogolaaneysa hay'adda beekhaaminta guryaha iyo abuuritaanka kuwo cusub. Bogga afar iyo tobnaad waxaa ku xusan liiska hantida ay MPHA tixgelineyso in ay u codsato u wareejinta RAD sanada 2024 taasoo ku saleysan daraasad lagu sameeyey, muhimad kala siinta hay'adda, iyo qodobo kale. Ogolaashaha codsi kasta waxaa raacaya lifaaq iyo nidaamka ka qeyb gelinta deganayaasha sida ay dhigayaan sharciyada HUD.

Horumarinta Joogtada Ah ee Guryaha Dadweynaha: Iyada oo la isticmaalayo dhaqaalaha xadidan ee aan ka helno dawladda dhexe, oo lagu lamaaniyo deeqda Barnaamijyada Guryaha dadweynaha, waxa aynu sii wadi doonaa in aan maalgelin ku sameyno oo aan muhimadda koowaad siino mashaariicda dayactirka iyo dib u casriyeynta, oo ay ka mid yihiin nidaamka dhismayaasha (biyo gelinta, Qaboojiyaha iyo kuleyliyaha (HVAC), wiishashka, bedelka daaqadaha, dayactirka dibadda kore ee guriga, iyo nidaamka dab damiska. Dood dheeraad ah oo ku saabsan *Baahida Maaliyadda Iyo Kharashka ee 2024 waxa aad ka heli kartaan Lifaaqa F*. *W*ada shaqeynta ka dhaxeysa Franklin Energy iyo Xcel Energy, MPHA waxa ay sii wadeysaa in ay bedesho qalabka guryaha ee duqoobay kuna bedesho kuwo cusub, beekhaaamiya tamarta, qiime ahaana ku haboon guryaha.

Qorshaha Mudada Dheer Ee Goobaha Kale: Sida horay lagu soo xusay, MPHA waxa ay dib u eegeysaa Aragtiyada Istaraatiijiyadda ee 2022/23, iyada oo sii wadda sheekeysiga hay'adaha bulshada iyo kuwa daneynaya ee hal abuurka mudada dheer ee la doonayo in lagu badbaadiyo loogana faa'iideysto sida ugu haboon hantida. Taas waxaa ka mid ah isu dheelitirka iyo u wareejinta sida uu dhigayo MTW ee guryaha lagu dhisay Fursadda Guriyeynta ee Maamulka Magaalada (Metropolitan Housing Opportunities Program), iyo sidoo kale iyo qorshaha guud ee nidaamka lagu xaqiijinayo gaaritaanka ujeedooyinka mudada dheer ee xaafadaha Herritage Park AMP oo wax looga qabanayo baahida maaliyadeed ee Heritage Park AMP; sida ugu wanaagsan oo hay'addu uga faa'iideysan karto guryaha Glendale Townhomes, halkaas oo ay naga go'an tahay dib u dhiska guryo casri ah oo fursado guriyeyn ay ka heli karaan qoyasas dheeraad ah. Waxaa intaas dheer, u guuritaanka mudada dheer, ee guryaha Glendale, taasoo ay naga go'an tahay in dib loo horumariyo si looga dhigo guryo casri ah oo qoysas dheeraad ah ka faa'iideysan karaan.

Barnaamijka Foojarka Mashruuca Ku Saleysan (PBV) : MPHA waxa ay xoojineysaa PBV: 1) dhiiri gelineysaa abuuritaanka guryo cusub oo dadka awoodo si wax looga qabto baahida bulshada ee guryaha 2) xaqiijinta in qeyb ka mid ah guryaha aysan noqon kuwo dadku aawoodo, laakiin kuwo loo qoondeeyo dadka "dakhligoodu aad u hooseeyo" kana hooseeyo 30 boqolkiiba heerka dakhliga ee dhexe (AMI). MPHA waxa ay sii wadeysaa in foojarka ku saleysan mashruuca PBV lagu bixiyo tartan dadweynaha u furan ka dibna loo dabaaldego dhismayaasha cusub ee lala wadaago hay'adaha kale sanadka 2023.

Raadinta Fursado Cusub Oo Guryo Lagu Dhisi Karo

Laga guuro Faircloth lona guuro RAD (FTR) waa hal abuur cusub oo ka yimid HUD kaasoo u ogolaanaya Maamulka Guryaha ay abuuri karaan guryo dheeraad ah oo bulshadu ay awoodaan. MHA sida uu dhigayo xadka u degsan xadka ee Faircloth ee HUD, waxa ay abuuri karaan guryo dheeraad ah ee kuwa ay iminka maamulaan oo ay gargaar dhaqaale dheeraad ah ka helaan u wareejinta guryaha ee RAD. MPhA waxa ay balaarisay Maamulka Faircloth si ay uga takhalusaan Guryaha Goonida u taagan ee Sectiuon 18. Guryaha 705 ah waxaa maamulaya hay'adda aan faa'iido doonka aheyn ee bulshada ee MPHA. Fursadaha dheeraadka ah ee lagu abuurayo guryo dheeraad ah ee Minneapolis waa mid suurogal ah. Gebi ahaanba, MPHA waxa uu barnaamijkan ku kordhinayaan ku kordhin kartaa 892 guri, taasoo ku saleysan wada shaqeyn hay'adaha guryaha ee gaarka ah iyo faa'iido doonka ah. Marka la dhiso guryaha, HUD ayaa maalgelinta u wareejineysa mashruuca foojarka ku saleysan. Maamulka Guryaha Dadweynaha Ee Minneapolis waxa uu raadinayaa hababka ugu wanaagsan ee lagu kordhin karo guryaha dadku awoodo ee bulshada. Hay'addu waxa ay raadineysaa sida ugu wanaagsan ee lagu gaari karo hadafkaas. Iyada oo taas la baacsanayo, MPHA waxa ay adeegsaneysaa isbedelka uu ogol yahay nidaamka MTW iyo kharashka hantida ma guurtada ah halka ay suurogalka tahay in la fududeeyo caqabadaha hortaagan maamulka. Taas waxa ka mid ah Mashruuca ku Saleysan Foojarka ee MPHA oO AH mid la jaanqaadaya qodobada heshiiska ee HAP ee ku shaqeeyo FMR. Iyada oo laga faa'iideysanayo isbedelka uu ogol yahay nidaamka MTW ee MPHA, hay'addu waxa ay raadineysaa fursadaha dhaqaalaha foojarka loogu qoondeyn lahaa taasoo ay cilmi baaristu tilmaameyso in ay MPHA awoodi karto abuuritaanka guryo laga soo wareejiyo Faircloth loona wareejiyo guryaha dadku awoodo ee RAD ee ay ka go'an tahay nidaamka. MPHA waxa ay u diyaargaroowday fursadaha ka dhalan kara FTR ee mustaqbalka dhow si go'aan loga gaaro sida loo dhaqan gelinayo qiimana loogu yeeli lahaa gaaritaanka hadafka jira.

Waxbarashada, Shaqaaleynta iyo Caafimaadka

MPHA waxa ay sii wadi doontaa balaarinta hal abuurka iyo wada shaqeynta ku jeeda abuuritaanka fursado shaqo, caafimaad, iyo fayo qabka dadka da'da ah, qoysaska shaqeeya iyo qoysaska aan u adeegno. Sanadka 2024, waxa aan xoogga saareynaa:

Koritaanka iyo Wax Ka Ogaashaha Guri Deggan Iskuul Deggan: *Guri Deggan Iskuul Deggan (Stable Homes Stable Schools)* waa barnaamij ay wadaagaan Magaalada Minneapolis, Degmada Hennepin, Maamulka Wabarashada ee Minneapolis, iyo YMCA ee Magaalooyinka Mataanaha ah. MPHA iyo magaalada ayaa si wadajir ah u maalgeliya qoysaska ay dugsiyadu u aqoonsadaan in ay hoy la'aan heyso. YMCA ayaa u fidisa adeegga maareynta. Waalidiinta waa in ay ka go'an tahay in ay ka qeyb qaataan waxbarashada ilmaha. Sanadka 2023, waxaanu kordhinay barnaamijka si uu ugu adeego qoysas iyo dugsiyo dheeraad ah. Iyada oo la eegayo baahida bulshada ee sii balaaraneysa iyo sida loogu guuleystay barnaamijkan bilowgii hore waxa ay MPHA sii wadeysaa xoojinta wada shaqeynta ee hay'adaha kale sanadaha soo socda.

Balaarinta Hawsha Isbahaysiga Caafimaadka ee Daaraha Dhaadheer (Highrise Health Alliance): MPHA, Waaxda Caafimaadka ee Waxaa Minneapolis, Gudiga Wakiilada ee Daaraha Dhaadheer (MHRC), iyo hay'adaha la shaqeeya dawladaha hoose iyo daryeelka caafimaadka ayaa si wadajir ah u bilaabay Highrise Health Aliance Mudadii cudurku ka dilaacay waddanka, wada shaqeyntaas ayaa u sabab noqotay in bulshada la gaarsiiyo talaalka COVID-19. Deganayaasha daaraha dhaadheer ee MPHA waxaa la soo darsay xaalad caafimaad oo aan la maareyn karin, taasoo kordhisay dadka la geeyo qolka gargaarka degdegga ah, iyo cisbitaalka oo la dhigo ayna kaga baxdo kharash badan oo noloshooda ay wax kaga qabsan kareen. Sanadkii la soo dhaafay wada shaqeynta dhex martay dhinacyada kala duwan ayaa suurto gelisay in la codsado deeq dhaqaale oo lagu taageero shaqadan muhimka ah. Sanadka 2024, isbahaysigu waxa ay sii wadi doonaan inuu isu keenaan hogaamiyayaasha dhamaan qeybaha kala duwan (caafimaadka , cudurada dhimirka, adeegga bulshada, guriyeynta) si loo aqoonsado muhimad kala siinta, qeybinta kheyraadka, iyo ololaha lagu wacyi gelinayo bulshada.

Qiimeynta Wada Shaqeynta Section 3 ee Magaalooyinka Mataanaha Ah: Sida ay dhigayaan sharciyada HUD ee barnaamijka Section 3, MPHA waxa ay sii wadi doontaa in ay xoogga saarto tababarka, shaqaaleynta, qandaraasyada, iyo fursadaha kale ee dhaqaale ee deganayaasheena iyo shakhsiyaadka kale ee dakhligoodu yar yahay. MPHA waxa ay safka hore kaga jirtaa Wada Shaqeynta Section 3 ee Magaalooyinka Mataanaha Ah ee hay'adaha gobolka (maamulka guryaha, xubnaha dawladaha hoose) ee ka qeyb qaadanaya diiwaan gelinta iyo nidaamka baaritaanka ee lagu fududeynayo in lagu xiro fursadaha dadka ka soo baxa shuruudaha ku xiran Section 3.

Abuuritaanka Community Choice (Fursadaha Guuritaanka) Maajo (May) 2021kii, Waaxda Guryaha iyo Horumarinta Magaalooyinka ee Mareykanka (HUD) waxa ay siisay MPHA iyo Gudiga Maamulka Guryaha ee Magaalooyinka $5.2 Milyan iyada oo lagu maamulayo Barnaamijka Foojarka Doorashada Guryaha. Barnaamijkan waa mid ku saleysan baaritaan dhawaanta la sameeyey kaasoo lagu ogaaday in xaafadaha ay ku yar yihiin dadka dakhligoodu hooseeyo ay kor u kacdo waxbarashada caruurta iyo fursadaha mudada dheer ee ku guuleysashada waxbarashada. Barnaamijka waa MPHA iyo Metro HRA ka caawinaya wax ka qabashada caqabadaha hor taagan kordhinta doorashada guryaha isaga oo fududeynaya waxyaabaha la xiriira guritaanka. Barnaamijkaas waxa kale oo qeyb ka ah, qiimeyn iyo baadigoob joogta ah oo ay sameynayaan, ABT Associates, si loo ogaado taageerada ugu haboon ee qoysaska ka caawin karta in ay guuleystaan. Barnaamijkan waa mid soconaya muddo 6sano ah. Sanadka hore waxa uu ahaa mid qorsheynta loogu talo galay, waxaana uu barnaamijku si wanaagsan u dhaqan galay Siteembar 2022 iyada oo qoysaskii ugu horeeyey ay u guureen guryaha xagaaga 2023. MpHA waxa ay ka faa'iideysaneysaa cahsharada laga bartay barmnaamijkan si loogu adeego bulshada foojarka.

Abuuritaanka Buug Fara Badan Leh: MPHA waxa ay xagaagii 2022 noqotay Degaan Buug Fara Badan Leh. Tan waa dadaal loo dhan yahay oo loola jeedo in lagu soo

bandhigo buugaag kala duwan, aad u qiimo badan, iyo adeegga akhriska iyo qoraalka ee caruurta iyo qoysaska ayna bixiyaan maamulka guryaha. MPHA waxaa soo gaaray ilaa 5,000 oo buug waxaana loo adeegsanayaa istaraatiijiyad kala duwan sidii buugtaas loo gaarsiin lahaa caruurta bulshadeena.

Howl Fulinta wanaagsan

Hawlaha MPHA waxaa halbowle u ah 300 oo qof oo shaqaale ah. In aan horumarino sida aan hawsheena u gudano waxa ay keeni kartaa in aan u kala horumarino sida ay u kala muhiimsan yihiin—oo si haboon ugu adeegno qoysaska iyo bulshada. Sanadka 2024, waxaanu fileynaa:

Isticmaalka farsamada casriga ah si loo kordhiyo wax qabadka

Janaayo 2021kii, MPHA waxa ay dhameystirtay u wareegista nidaamka cusub ee kombiyuutarada ee Yardi. Nidaamkan cusub ee kombiyuutarada waxa uu hay'adda u fudueynayaa sida ay hawshooda u gutaan, oo ay ka mid tahay nidaamka liiska sugayaasha iyo nidaamka dib u cusbooneysiinta, iyo sida loo codsado dayactirka iyo eegista guryaha. Sanadkii 2023, waxaanu bilownay in qoraalada la daabaco u wareejino habka elektaroonigga ah. Si loo kordhiyo tayada iyo hababka kale oo deganayaasha MPHA ku bixin karaan kirada, MPHA waxa ay dhaqan gelineysaa habka lacag bixinta adinka oo isticmaalaya nidaamka kombiyuutarada ee 2024. Yardi.

Gudi U Gelista Hawsha Hay'adda (oo ay ka mid tahay Isku dhafka, Sinaashaha iyo Ka wada qeybgalka)

MPHA waxaa ka go'an in ay eegto doorka barnaamijyada guryuhu ka ciyaaraan wax ka qabashada baahida bulshada ee heybsooca soo jireenka ee ka dhex jira bulshada. Sanadka 2024, waxaanu fileynaa wada shaqeyn dhex marta khubarada DEI, iyada oo gudiga DEI ay taageero ka bixinayaan talaabooyinka la qaadayo iyaga oo si taxadar leh daraasad ugu sameynaya dhaqan gelinta Barnaaij Cusub ee Diyaarinta Hogaamiyayaasha iyo Tababarka kuwa Xiga. Gudigan waxa uu hay'ada ka caawinayaa in la xaqiijiyo miisaaniyadeena, dhaqan gelinta sharciga, nidaamka cusub ee hawlaha iyo ka qeyb gelinta ayaa qiimeyn lagu sameeyey iyada oo loo marayo isku dhafka iyo u sinaashaha. Ka dib markii qiimeyn lagu sameeyey xogta la hayo, waxaanu beegsaneynaa xoojinta shaqo qorista, shaqaaleynta, hawlgelinta iyo nidaamka tababarada si loo gaaro ujeedooyinka istaraatiijiyadeed ee MPHA sidii ay u noqon laheyd mid dadku jeclaadaan oo u soo shaqo tagaan.